ADRC Aging & Disability Resource Center

Wax Badan liga sheeg...

Family Care (Daryeelka Qoyska)

FAMILY CARE Options for Long-Term Care

Waa maxay Family Care?

Family Care waa barnaamij cusub oo siiya dadka qayb buuxda oo adeegyada daryeelka xiliga dheer ah, dhammaan dhexda dheefta barnaamijka ee debecsan. Si loo fahmo Family Care, waxay caawisaa ogaanshaha waxay tahay "daryeelka xiliga dheer." Daryeelka xiliga dheer ee adeeg kasta ama taageero ee qofka u baahan karo sidii natiijada naafanimada, sii gaboobida, ama qabista jirro raagta oo xadida kartidooda ay ku sameeyaan waxyaabahan kuwaas oo qayb ka ah habkooda maalinlaha ah. Tan waxaa ka mid ah waxyaabaha sida qubayska, lebisashada, samaynta cuntadda, shaqo tegida, iyo bixinta biilashada.

Waxaa jira adeegyo kala duwan iyo taageerooyin laga heli karo Family Care oo ka caawiya dadka inay usii madax banaanaadaan hawlahooda maalin laha ah ama inay taageero bixiyaan si ay u taageeraan qofku inuu dhammaystiro hawlahooda.

Sidee Family Care u shaqaysaa?

Dadku waxay Helaan Maamulka Daryeelka Qaybaha Kala duwan.

Waqtiga qaarkood dadku ma garanayaan adeegyada dhabta ah ee ay u baahanyihiin, noocyada adeegyada la heli karo, iyo sida loo helo daryeelka iyo adeegyada. Isku duba ridka adeegyadaada waxay noqon karaan kuwa baaxad leh. Haddii aad ka qayb gasho barnaamijka Family Care, markaa kooxda dadka waxay isugu yimaada wada jir si ay u caawiyaan aqoonsashada nooca caawimada aad u baahan karto oo kaala shaqeeyaan inaad habbayso adeegyadaada daryeelka xiliga dheer. Waxaad tahay ka qayb gale firfircoon oo kooxda ah kaas oo sidoo ku dara, inta ugu yar, maareeyaha daryeelka iyo kalkaalisada diiwaanka gashan., Waxaad dooran kartaa inaad ku darto xubinta qoyskaaga ah ama qofka aad jeceshahay ee kooxdaada. Waqtiga qaarkood dadku waxay doortaan xirfad yaqaano, sida shaqaalaha daryeelka gaarka ah, si looga qayb galo xubin koox ahaaneed. Gudaha Family Care, kooxdan waxaa loogu yeedho "kooxda qaybaha kala duwan."

Dadku waxya u helaan adeegyada Si ay Ugu noolaadaan Gurigooda Markasta oo ay Suuragal tahay.

Caawinta dadka inay guriga joogaan waa wadnaha barnaamijka Family Care. Haddii aad ku nooshahay guri, dabaq, guryo la wada dego ama guri wareega, kooxda Family Care way kula shaqayn doontaa adiga markaas waxaad joogi kartaa gurigaaga. Badanka adeegyada waxaa lagu siin karaa xaga guriga dad badan. Haddii aad hadda ka hor degen tahay xarunta taakula nolosha ama guriga daryeelka aanad iska bixin karin adigu, ka dib Family Care waxay kugu caawin kartaa inaad hesho meel kale oo aad ku noolaato oo buuxinaysa baahiyahaaga qiime aad u karto inaad iska bixiso. Family Care waxay kaala shaqeeyaan adiga inaad hesho oo haleesho xaalada nolosha ee ugu fiican.

Dadka ka Qayb gala Go'aan ka gaadhida Adeegyada ay Helaan.

Tallaabada koowaad ee qoysahsynta adeegyada Family Care waa inaad adigu kala hadasho kooxdaada nooca nolosha aad doonayso, haddii aad doonayso inaad ku noolaato halka aad ku nooshahay hadda ama meel ka duwan, nooca taageerada aad u u baahantahay inaad ku noolaato nooca nolosha aad doonayso. Tallaabada waxaa loogu yeedhaa qiimayn.

Adeegyada aad heli doonto ka dib waxaa lagu muujiyaa qorshaha daryeelka. Xubnaha kooxd waxay kaa taageeraan horumarinta qorshahaaga iyagoo ku siinaya macluumaad aad u baahantahay si ay u sameeyaan doorashooyin laga warqabo oo ku saabsan daryeelka aad hesho. Qorshahaaga daryeelku waxa uu kaa caawin doonaa inaad u dhaqaaqdo dhanka natiijooyinka gaarka ah ee adiga iyo kooxdaada lagu aqoonsaday qiimaynta.

Dadku waxay doortaan Adeeg bixiyayaal ka socda Shabakad Dhammaystiran.

Xubnaha Family Care waxay ka doortaan adeeg bixiyaashooda daryeelka xiliga shabkada adeeg bixiyaha. Ururada Daryeelka La maamulo (MCOs), waa wakaaladaha siiya dheefta Family Care dadka. MCOs waxa looga baahanyahayinay haystaan adeeg bixiyayaalka dhammaan adeegyada uu daboolo barnaamijka oo haystaan adeeg bixiyaal ku filan iyo goobta lagu siinayo xubnaha doorasho.

Waxaad qeexdaa natiijooyinka noloshaada.

Dadku waxay ku helaan Adeegyada Ay u baahanyihiin Dhexda Hal Barnaamij.

Kala saarida barnaamijyada maalgelinta badan si loo go'aamiyo dheefahaaga suuragalka ah inay noqon karaan kuwa wareer leh. Warka wanaagsa waa Family Care waxay bixiyaan adeegyada daryeelka xiliga dheer, laguugu gaar yeelay adiga gudaha qorshahaaga daryeelka, dhexda hal barnaamij.

Dadku waxay helaan Adeegyada Sida Wanaagsa Guul ugu soo hooya Natiijooyinka Ay rabaan.

Guusha Barnaamijka Family Care waxaa lagu qiyaasaa natiijooyinka nolosha dhabta ah, ama natiijooyinka aadka hesho adeegyada aad hesho. "Natiijooyinka Tayada Nolosha" gudaha Family Care waxay meteshaa qaybo muhiim ah oo nolosha dadka ah.

Warbixinaha soo socda waa "Natiijooyinka Tayada Nolosha" ay kooxda Family Care ku dedaasho markaad ka qayb gasho barnaamijka. Waxaad qeexdaa natiijooyinka noloshaada. Kaa caawisaa buuxinta baahiyaha daryeelka xiliga dheer si loo gaadho natiijooyinkaaga gaarka ah waa hadafka Family Care.

- Waxaan go'aamiyaa halka iyo cida aan la noolaanayo.
- Waxaan gaadhaa go'aanka ku saabsan taageerooyinkayga iyo adeegyada.
- Waxaan go'aamiyaa sida aan u qaato maalintayda.
- Waxaan la leeyahay xidhiidh qoyska iyo saaxiibada.
- Waan shaqeeyaa ama sameeyaa waxyaabo kale oo aniga ii muhiim ah.
- Waxaan ka qayb qaataa bulshaddayda.
- Noloshaydu way degentahay.
- Waa ial i tixgeliyaa oo waxaa la iila dhaqmaa si xaq ah.
- Waxaan leeyahay gaar ahaansho.
- Waxaan haystaa caafimaadka ugu wanaagsan ee suuragalka ah.
- Waxaan dareemaa badbaado.
- Waxaan ka xor ahay xad gudub iyo dayac.